

Warsidaha

ISGAARSIIN

Lix biloodle ay soo saarto Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka



XAFLADDA DAAHFURKA
ADEEGGA ISKU-XIRKA
SHIRKADAHA ISGAARSIINTA DALKA.

NCA
Hay'adda Isgaarsinta Qaranka
National Communications Authority

[SOMALIANCA](#) [SOMALIANCA](#) WWW.NCA.GOV.SO

ISKU-XIRKA ADEEGGA SHIRKADAHA ISGAARSIINTA OO LAGU GUULEYSTAY

HIQ oo Shahaado
Caalami ah ku
guuleysatay

Qorshaha 5ta
sano ee HIQ oo
la diyaariyay




Warsidaha
ISGAARSIIN



Sanadka 1aad
Caddadka 1aad
Janaayo - Juun 2023

Cinwaan:

- @ : info@nca.gov.so
- 🌐 : <http://www.nca.gov.so>
- 📘 : Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
- 🐦 : @SomaliaNCA



NOA



“Hay’adda Isgaarsiinta Qaranka, waxay u taagan tahay hirgelinta qorshayaasha horumarineed ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliyeed.”


Warsidaha ISGAARSIIN

Warsidaha Isgaarsiin

Waa lix-biloodle ay soo saarto Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka. Waxaana lagu soo bandhigi doonaa waxqabadka hay'adda iyo wararka arrimaha Isgaarsiinta ee dalka.

Cinwaan:

- @ : info@nca.gov.so
- 🌐 : <http://www.nca.gov.so>
- 📘 : Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
- 🐦 : @SomaliaNCA



*"Hadafka HIQ oo
kaashanaysa Wasaaradda
Boostada & Isgaarsiinta
waa horumarinta Isgaarsiinta
iyo Teknolojiyada Dalka.*

CANAAWIINTA



Isku-xirka Adeegga Shirkadaha Isgaarsiinta oo lagu guuleystay



Shirweynaha Hay'adaha Isgaarsiinta Adduunka GSR



Koruqaadidda xirfadda Shaqaalaha HIQ



Maalinta Gabdhaha ICT Adduunka oo Muqdisho ...



Shirweynaha Caalamiga ee Talefannada Gacanta



Habraaca looga baahan yahay Shirkadaha ka shaqeeya Fiber-ka



Fulinta Go'aannadii Guddiga Qaran ee Ka-hortagga Lacag-dhaqidda

HORDHAC

Waa caddadka koowaad ee Warsidaha ISGAARSIIN ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, wuxuuna soo koobayaa waxqabadka hay'adda ee lixdii bilood ee la soo dhaafay. Waxyaabaha ugu waaweyn ee caddadkan lagu soo bandhigayo waxaa ka mid ah: Hirgelinta Adeegga Isku-xirka Shirkadaha Isgaarsiinta Dalka. kaasoo loogu talagalay inuu daboolo baahida dadweynuhu u qabaan inay isla xiriiri karaan iyagoo isticmaalaya shabakado kala duwan.

Waxaa kaloo lagu soo bandhigayaa macluumaad ku saabsan HIQ oo heshay Shahaadada ISO 9001:2015, taasoo ka dhigeysa hay'addii ugu horreysay ee dowladda oo hessa shahaadada ISO.

Dakhligii ka soo xaroon jirey Shirkadaha Isgaarsiinta oo kordhay iyo HIQ oo xubin ka noqotay Guddiga Maamulka Ururka Arabsat ayaa ka mid ah qormooyinka caddadkan.

Iyadoo maanka lagu hayo hiigsiga fog ee HIQ ayaa waxaa la dhammaystiray istiraatiijiyadda 5-ta sano ee (2023-2027) kaddib markii annu ka yeelanay kulamo is daba-joog ah iyo falanqeyn lagu ogaanayo waxyaabaha muhiimka inoo ah iyo ujeedooyinka waaweyn ee Hay'adda. Istiraatiijiyaddan waxay ina siineysa khariidadii aan u mari lahayn gaarista ujeedooyinkeenna la xiriira fududeynta iyo horumarinta isgaarsiinta iyo teknoolojiyadda dalka.

Gabagabadii, waxaan rajeyneynaa inaan idinkula wadaagno wargeyskan warbixinno badan oo ku saabsan horumarka HIQ iyo weliba qaabeynta mustaqbalka qeybaha isgaarsiinta iyo teknoolojiyada waddankeenna.

Erayga Maareeyaha Guud



Waxaan aad ugu faraxsanahay in aan idiin soo gudbiyo daabacaaddii ugu horreysay ee Warsidaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ). Wargeyska oo noqon doono lix biloodle, waa madal aan ku soo bandhigi doonno waxqabadkeena iyo guulaha hay'adda ee ku aaddan gaaritaanka hadafyada aan hiigsaneyno ee la xiriira fududeynta iyo horumarinta isgaarsiinta iyo teknolojiyada dalka.

Ka sokow inuu warsidahani inoo noqon doono goob aan ku ururino, ku keydino, kuna soo bandhigno waxqabadka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, haddana wuxuu noqon doonaa goob laga dheehan doono gudashada waajibaadkeena iyo xilka aan u hayno ummadda Soomaaliyeed.

Abuurista warsidahan oo aan u arko inay tahay tallaabo wanaagsan oo aan u qaadnnay dhinaca is-xilqaanka iyo horumarka, waxaan jeclahay inaan halkan uga mahadceliyo Wasiirka Wasaaradda Md. Jaamac Xasan Khaliif oo nagu dhiirigeliyay soo-saaristiisa. Sidoo kale waxaa mahadcelin iga mudan madaxda waaxyaha kala duwan iyo shaqaalaha HIQ ee sida hagar la'aanta uga shaqeeyay xaqiinta inaan gudano waajibkeenna. Waxaan ugu dambeyn u mahadcelinayaa cid kasta oo gacan nagu siisay tallaabadan.

Mahadsinidiin

Mustafa Yaasiin Sheekh
Maareeyaha Guud
Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

AWOODDA & WAAJIBAADKA

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, waa hay'adda mas'uulka ka ah fududeynta iyo horumarinta isgaarsiinta iyo teknolajiyada dalka. Hay'adda waxaa lagu dhisay Sharciga Isgaarsiinta Qaranka ee 2017, kaasoo awood u siinaya in ay nidaamiso suuqa isgaarsiinta iyo teknolajiyada dalka oo ay ku jiraan; Isgaarsiinta, Internetka, ICT-da iyo Adeegyada Ganaciga Elektarooniga (E-commerce).

Qodobka 6aad

ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka ayaa ka hadlaya awoodda iyo waajibaadka Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, kuwaasoo kala ah:



01. Hay'addu

Waxay yeelanaysaa awoodda maamul ee isgaarsiinta qaranka, sida rukhsad bixinta iyo xeer-nidaaminta adeegyada isgaarsiinta ee dhammaan soohdimaha Soomaaliya si waafaqsan sharciga.

02. Ka sokow,

Arrimaha ku xusan faqradda koowaad, hay'addu waxay awood u yeelanaysaa fulinta arrimaha soo socda: -

- ➔ Waxay geli kartaa heshiisyo, qaadan kartaa deyn iyadoo la raacayo nidaamka dalka
- ➔ In ay yeelato, gadato, kireysato hanti guurta ah ama ma guurta ah si waafaqsan Sharciga Maaliyadeed ee dalka.

03. Talo-bixinta,

Diyaarinta xeer-nidaamiyeyaal la xiriira Qeybaha Isgaarsiinta, kana qeyb-qaataan fulintooda, iyadoo hay'addu la-tashanaysa dhinacyada ay quseyo.



HAY'ADDA ISGAARSIINTA QARANKA



U-TAAGAN TAHAY FUDUDEYNTA
IYO HORUMARINTA ISGAARSIINTA
& TEKNOLOJIYADA DALKA.



04. Soo-saaridda

Xeer-nidaamiyeyaal iyo go'aanno lagama-
maarmaan ah u fulinta xilkeeda iyo Sharciga
Isgaarsiinta Qaranka.

05. Bixinta

Rukhsadaha iyo soo-jeedinta canshuuraha
la xiriira maareynta hirarka, kala-soocidda
xisaabaha, isku-xirka, la- socodka shabakadaha
iyo adeegyada isgaarsiineed.

06. Talo-bixinta

Qiimaha tariifadaha, lambarrada iyo kobcinta
tartanka suuqa iyo adeegga isgaarsiinta
dalka.

07. Xallinta

Khilaafaadka shirkadaha Isgaarsiinta,
Iyadoo u saaraysa guddiyo farsamo oo
dhexdhexaadiya.

08. Ilaalinta

Xuquuqda macaamiisha iyo xogaha adeegga,
Xisida :

- Tariifada Adeegga.
- Suurtagalnimada iyo helidda adeegga; iyo
- Tayada iyo heerka adeegga.

09. Diyaarinta

Shuruudaha, halbeegga, iyo habka loo bixinayo
shatiyada shabakadaha, adeegga Isgaarsiinta
iyo isticmaalka mowjadaha iyada oo aan waxba
loo dhimayn shuruudaha Sharciga Isgaarsiinta
Qaranka uu jeediyey.

10. Hay'addu

Iin ay qaaddo talaabooyinka lagama
maarmaanka u ah si loo xakameeyo, isla
markaana lala xisaabtamo cidda jebisa ama ku
xadgudubta xeerka.



Shirweynaha Hay'adaha Isgaarsiinta Adduunka GSR 2023

June, 2023

Wafdi ka socday HIQ ayaa ka qeybgalay Madasha Caalamiga ah ee Hay'adaha Isgaarsiinta Adduunka (GSR-23) oo uu soo qabanqaabiyay Midowga Isgaarsiinta Adduunka (ITU). Madashan oo lagu qabtay magaalada Sharma El-Sheekh ee dalka Masar ayaa waxaa isugu yimid madaxda Hay'adaha Isgaarsiinta Adduunka, iyadoo isku dhaafsanaya waayo-aragnimadooda la xiriirta horumarradii ugu dambeeyay ee nidaaminta qeybaha isgaarsiinta iyo teknoloojiyada.

Maalintii ugu horreysay ee shirweynaha wuxuu Maareeyuhu ka qeybgalay dood-cilmiyeed loogu talagalay madaxda Hay'adaha Isgaarsiinta Adduunka, halkaas oo uu kaga hadlay istaraatiijiyadda qaranka iyo hababka lagu kobcin karo iskaashi dhexmara qeybaha kala duwan ee ka shaqeyaa adeegyada dhijitaalka. Wuxuu Maareeyuhu xusay muhiimadda ay leedahay in la yeesho siyaasad iyo xeer-nidaamin kor u qaadaysa hal-abuurka, tartanka suuqa iyo ilaalinta macaamiisha.



Agaasimaha Qeybta Horumarinta Isgaarsiinta ee Ururka (ITU- BDT), Md, Cosmas Zavazava



Maareeyaha iyo Xoghayaha Guud ee Ururka Isgaarsiinta Afrika (ATU), Md. John Omo.

“Iskaashi dhexmara dowladda iyo ganacsatada wuxuu suuragalinaaya in la wadaago khibrad iyo aqoon suurtoogelisa in la hirgeliyo adeegyo dhigitaal ah oo faa'iido u leh bulshada” ayuu yiri Maareeyaha oo intaa ku daray “waxaa iyadana laga maarmaan ah in la helo hab isku dhafan oo u dhaxeeya hay'adaha kala duwan ee dowladda si loo hubiyo is-waafaqsanaanta siyaasadaha iyo xeer-nidaamiyeyasha.”

Inta uu socday shirkan, maareeyuhu wuxuu kulamo doceedyo dhowr ah la qaatay mas'uuliyiin kala duwan oo qeyb ka ah wufuudda ka qeybgalaysa shirka. Kulan doceed-kii u horreeyay ayuu Maareeyuhu la qaatay Xoghayaha Guud ee Ururka Isgaarsiinta Afrika (ATU), Md. John Omo. Waxaa kulanka diiradda lagu saaray arrimaha soo socda:

- In dib loo cusbooneysiyo xubnimada Soomaaliya ee ururka ATU
- In la baxiyo wixii khidmad xubinnimo ah ee nalagu leeyahay
- In aan ka qeybqaadano shirarka iyo barnaamijyada uu qabato ururku.
- In ATU ay naga caawiso qaraarka gaarka ah ee Soomaaliya ay rabto in loogu ansixiyo shirka soo socda ee - Shirka Raadiyowga Dunida - (World Radio Communication Conference)



Maareeyaha Guud ee HIQ wuxuu kaloo kulamo la qaatay Agaasimaha Qeybta Horumarinta Isgaarsiinta ee Ururka Isgaarsiinta Aduunka (ITU- BDT), Md, Cosmas Zavazava, iyo Madaxa ITU ee dalalka Carabta, Md, Caadil Darwiish, waxayna kawada hadleen qoddobadan soo socda:

- In la dhammeystiro barnaamijka ITU ee dalka Soomaaliya ka hirgelineyso (ITU country Program) kaas oo xoogga saaraya in shuruucda iyo xeernidaamiyeyasha isgaarsiinta kor loo qaado si loo kordhiyo isku-xirka (Connectivity), kaabayaasaha isgaarsiinta, iyo amniga internet-ka. Sidoo kale barnaamijka wuxuu ka shaqeynayaa in aqoonta iyo farsamada isgaarsiinta la kordhiyo gaar ahaan gabdhaha, dhallinyarada, iyo dadka baahiyaha gaar ka ah qaba.

Ugu dambeyntii, wuxuu Maareeyaha Guud ee HIQ kulan la qaatay, Md. Napoleon Adok Gai, Agaasimaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta South Sudan kaasoo ay ka wada hadleen arimaha soo socda:

- In dalka South Sudan uu ka faa'ideyso xargaha fiber-ka badda (submarine fiber cables) ee xeebaha dalka Soomaaliya mara, iyadoo la isku xiraayo dalalka Soomaaliya, Kenya, Ethiopia iyo South Sudan. Arrintaas oo fursad u noqoneysa shirkadaha Isgaarsiinta ee dalka ay adeegyadooda internetka ay gaarsiiyaan dalal badan oo bartamaha Afrika ku yaala
- In labada Hay'adood ay iska kaashadaan arimaha amniga internet ka iyo ka hortagga khatarada amniga internet ka iyo lambarada dadka lagu dhibaateeyo



Maareeyaha iyo Madaxa ITU ee dalalka Carabta, Md, Caadil Darwiish



Maareeyaha iyo Md. Napoleon Adok Gai, Agaasimaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta South Sudan





KULANKA 179aad EE GUDDIGA MAAMULKA ARABSAT

Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh ayaa ka qeyb galay kulankii 179-aad ee Guddiga Maamulka (Board of Directors) ee Ururka ARABSAT, isaga oo ku metalayey dalkeena oo ka mid ah asaasayaasha iyo saamileyda Ururka Dayax-gammeedka Carbeed ee ArabSat.

“**Soomaaliya markii ugu horreysay waxay xubin ka noqotay Guddiga Maamulka ee Ururka ee ARABSAT sanadihii 1983 - 1985kii.**”

Soomaaliya ayaa xubin ka noqotay mar kale Guddiga Maamulka ee ARABSATsannadkii 2022-kii, tan iyo markaasna wuxuu Maareeyuhu si dhow ula shaqeynayay guddigaas, isagoo iskaashi kala sameeyay guud ahaan mas'uuliyiinta ARABSAT sidii loo casriyeyn lahaa qaybta baahinta dhigitaalka ah ee dalkeenna.



Ururka ARABSAT xaruntiisa waa magaalada Riyad ee dalka Sacuudiga, waxaa ku mideysan dhammaan waddamada ku mideysan Ururka Jaamacadda Carabta marka laga reebo dalka Comoros (Ururka Jaamacadda Carabta waxaa ku mideysan 22 dal).

Ururka ARABSAT wuxuu u dhisan yahay sidii shirkad oo kale, oo dhammaan waddamada carabta ayaa saami ku wada leh, waxaana ugu saami badan dalka Sacuudiga oo leh in ka badan 36%.

Soomaaliya waxay ka mid tahay saamileyda ARABSAT, waxayna markii ugu horreysay xubin ka noqotay Guddiga Maamulka Sanadihii 1983 - 1985 tan iyo markii la aasaasay ururka 1976-kii. Xubinimada Soomaaliya e guddigan ayaa kor u qaadaysa wada-shaqeynta iyo baahinta addeegyada ARABSAT ee dalkeenna.

MUSTAFA YAASIIN

“ In aan xubin ka noqdo Guddiga Maamulka ee ARABSAT waxay i siisay fursad aan si wanagsan ugu fahmo Arabsat, islamarkaana aan ugashaqeeyo kor u qaadista kobaca qeybta baahinta (broadcasting) ee dalkeena. ”



Maareeyaha Guud ee HIQ

Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayay dhawaan u soo idlaatay xubinnimada Guddiga Maamulka ee Ururka Dayax-gacmeedka Carbeed ee (Arabsat) taasoo loo doortay bishii Oktoobar, 2022 kuna ekayd bishii May 2023.



Soomaaliya waxay ka mid ahayd waddamadii aasaaska u dhigay Ururka Dayax-gacmeedka Carbeed ee (ARABSAT) sanadkii 1976-dii.



Maareeyaha ayaa intii uu xubinta ka ahaa guddigan door muhiim ah ka qaatay horumarinta danaha Soomaaliya ee shirkadda dhexdeeda iyo ka qayb qaadashada sidii loo casriyeyn lahaa qeybta baahinta dhigitaalka ah ee dalkeenna.

“In aan xubin ka noqdo Guddiga Maamulka ee Ururka Arabsat waxa ay i siisay fursad aan si wanagsan ugu fahmo Arabsat, islamarkaana aan uga shaqeeyo kor u qaadista kobaca qeybta baahinta (broadcasting) ee dalkeena, sidoo kale annaga oo kaashanayna shirkadda Arabsat, waxaa noo suurtagashay inaan helno saamiga dakhliga Soomaaliya ee sanadihii 2018kii ilaa 2020kii, waxaan ku faanayaa in aan qeyb ka ahaa dadaalkan, waxaana rajeynayaa in aan sii wadno iskaashigeenna mustaqbalka” ayuu yiri Maareeyaha.

Kaalintii uu maareeyuhu ku lahaa Guddiga Maamulka ee Ururka Arabsat ayaa gacan ka geystay in xiriir xooggan uu dhexmaro Soomaaliya iyo dalalka xubnaha Ururka Arabsat. Dalkeenna ayaana ka mid ah asaasayaasha iyo saamileyda Ururka Arabsat.

Shirkadda Arabsat oo la aas'aasay sannadkii 1976-dii ayaa ka shaqeysa sidii loo gaarsiin lahaa dowladaha Carabta adeegyo isgaarsiineed oo ku saleysan satellite-ka.



HIQ oo Talo-bixin Dadweyne gelinaysa Qabyo-qoraalka Qorshaha 5^{ta} sano

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa ku casuumeysa qeybaha kala duwan ee bulshada in ay ra'yigooda ka soo bixiyaan qabyo-qoraalka Qorshaha Istaraatiijiga ah ee 2023-2027, kaas oo noqonaya qorshihii istiraatiijyadeed ee ugu horeeyay ee rasmi ah oo ay soo bandhigeysa HIQ.

HIQ oo ah tan nidaamisa suuqa isgaarsiinta iyo teknoolojiyada dalka, waxay qorshahan uga gol leedahay sidii loo abuuri lahaa suuq ku dhisan nidaam iyo sharci oo uu dalku yeesho. Iyada oo laga duulayo hiigsiga iyo aragtidaas, ayaa Qorshahan wuxuu ku qotomaa siddeed (8) ujeedooyin istiraatiijii ah, kuwaas oo kala ah:

1. Helidda adeeg isgaarsiineed oo la awoodi karo, oo gaara dhammaan dalka;
2. In la helo suuq furan oo xor ah oo tartan caafimaad lehi ka jiro;
3. Horumarka waara ee isgaarsiinta iyo teknoolojiyada;
4. Falanqeynta suuqa Isgaarsiinta;
5. Xaqiijinta suuq-nidaamin habboon;
6. Haggajinta wadatashiga & xiriirka daneeyeyaasha;
7. Kor-u-qaadidda iskaashiga iyo wax wada-shaqeynta; iyo
8. Ilaalinta Xuquuqda Macamiisha.

Dhowaan HIQ waxay noqotay hay'addii dowladeed ee ugu horreysay Soomaaliya ee hesho Shahaadada ISO 9001:2015 ee maamul-wanaagga. Guushan ayaa muujineysa sida ay HIQ uga go'an tahay in ay dardargeliso howlaheeda, iyadoo sidoo kalena muujineysa sida ay uga go'an tahay in adeegyadeedu ay noqdaan kuwo ku dhisan tayo sare.

Mudane Mustafe Yaasiin, Maareeyaha Guud ee HIQ, ayaa yiri "Iyada oo uu nahagayo qorshaheenna cusub, waxaan la shaqeyn doonnaa hay'adaha kala duwan ee dowladda iyo daneeyeyaasha kaleba si aan u xaqiijinno gaaritaanka yoolasha istiraatiijiga ee ku xusan Qorshahan."

HIQ ayaa ra'yi-gelinta qabyo-qoraalka Qorshahan uga dan leh in danneeyeyaasha kala duwan ee adeegyada isgaarsiinta iyo teknoolojiyada ku biiriyaan talooyinkooda si loo waafajiyo baahiyada iyo himilooyinka shacabka Soomaaliyeed, la dhiirrigeliyo daahfurnaanta, iyo in dadka oo dhan laga qeybgeliyo qorshaha lagu hormarinayo isgaarsiinta iyo teknoolojiyada dalkeenna.

Haddaba, HIQ waxa ay ku dhiirri-gelineysaa shakhsiyaadka iyo hay'adaha daneynaya in ay talooyinkooda ka soo dhiibtaan qabyo-qoraalka qorshahan.

Faallooyinka iyo talasoojeedinta waxaa lagu diri karaa iimeylka consultation@nca.gov.so ugu dambeyn 20 Luulyo, 2023.

Hay'addu waxa ay si taxaddar leh u eegi doontaa dhammaan faallooyinka ay hesho ka hor inta aysan dhameystirin qorshaha istaraatiijiga ah ee 2023-2027.

Qorshaha marka la ansixiyo waxaa uu noqon doonaa mid laga heli karo mareegta HIQ bisha Agoosto, 2023.


HIQ waxa ay ku dhiirrigelineysaa shakhsiyaadka iyo hay'adaha daneynaya in ay talooyinkooda ka soo dhiibtaan qabyo-qoraalka qorshahan. farriintaada ku soo dir: consultation@nca.gov.so ugu dambeyn 20 Luulyo, 2023."

Faahfaahin

Qorshaha 5^{ta} Sano ee HIQ

Qorshaha Istaraatiijiyadda Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka wuxuu ku saleysan yahay hiigsiga hay'adda ee ah in la yagleelo suuq isgaarsiineed oo tartan ka jiro kaas oo ay dadka Soomaaliyeed ka heli karaan adeegyada ay u baahan yihiin, kuna helaan qiimo ay awoodi karaan, kana qeyb qaadanayana kobaca dhaqaale ee dalka iyo fududeynta isku-xirka dadka Soomaaliyeed iyo dunida.

Qorshaha Istaraatiijiyadda wuxuu si guud diiradda u sarayaa qodobada ay ka midka yihiin: Tayo-wanaagga Howlaha (Operational Excellence), Hannaanka sharciyada iyo nidaaminta (Regulatory Framework), Kor u qaaddidda tayada adeegyada Isgaarsiinta (Enhancing Quality of Services), iyo Horumarinta Kaabayaasha Isgaarsiinta (Infrastructure Development)



Faahfaahinta Ujeeddooyinka 8da ah



1 in suuqa isgaarsiinta uu noqdo mid furan oo tartan caafimaad leh ka jiro, si dhammaan dadka Soomaaliyeed, gaar ahaan dadka danyarta ah ay adeeg isgaarsiin u helaan.



2 in la nidaamiyo lana maamulo tartanka suuqa isgaarsiinta si looga hortago waxyaabaha wax u dhimi karta suuqa xorta ah ee isgaarsiinta, si loo helo tartan caafimaad qaba.

3 in meel sare la gaarsiyo awoodda hay'adda ay ku maamuleyso suuqa isgaarsiinta, dhinaca khibrada iyo awoodda farsamo, tayada maamul, iyo tasiilaadka kale ee loo baahan yahay.



4 in Hay'addu ay sameyso qiimeynta joogta ku samayso suuqa isgaarsiinta si loo xaliyo caqabadaha soo kordha.



5 in la abuur xeerndaaamin fududeynaysa in suuqa isgaarsiinta uu kobco, iyadoo la diyaarinaayo shuruucda, xeerndaa-minta iyo rukhsadaha loo baahan yahay.



6 in la wanaajiyo xiriirka iyo latashiga ka dhexeeya Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka iyo daneeyayaasha isgaarsiinta dalka.

7 in la abuur iskaashi dhex mara daneeyayaasha kala duwan ee dalka iyo dibadda ah si loo gaaro yoolka horumarinta isgaarsiinta dalka.



8 in Hay'addu kor u qaaddo ilaalinta macaamiisha isgaarsiinta, lagana hortago howlaha ganacsi ee aan cadaaladda ku dhisneyn.

HIQ oo xubin ka noqotay Shabakadda Hay'adaha Isgaarsiinta Carabta

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) ayaa xubin ka noqotay Shabakadda Hay'addaha Isgaarsiinta Dalalka Carabta taas oo lagu ansixiyay shirweynihii 19-aad kaddib markii xubnaha shabakaddu ay si loo dhan yahay u soo dhaweeyeen codsiga xubinimo ee HIQ.

Shabakaddan ayaa la aasaasay sannadkii 2003-dii. HIQ ayaa wakiil u noqon doonto Dowladda Federaalka iyo qeybaha Isgaarsiinta iyo Teknoolijiyadda Soomaaliya, waxay na soo bandhigeysaa hormarka qeybtani ay ku tallaabsatay iyo fursadaha ay u leedahay Gobolka Carabta.

HIQ waxay qorsheyneysaa iskaashi iyo wada-shaqeyn ay la yeelato dalalka xubnaha ka ah shabakaddan si la isu dhaafsado fekradaha iyo waayo-aragnimada nidaaminta qeybaha isgaarsiinta iyo teknoolijiyada,



AREGNET

Dhinaca kale waxay hay'addu ku howlan tahay casriyeynta kaabashayaasha isgaarsiinta iyo adeegyada ICT-ga si wax-ku-ool ah oo ku habboon iyo istaageerid xubnaha shabakadda midba midka kale si loo gaaro Hadafka Horumarka Waara ee 2030 ee ku saabsan kordhinta helitaanka iyo isku-xirka adeegyada dhigitaalka ah.

MAAREEYAHA HIQ OO BOOQDAY SIMAD INNOVATION LAB

Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh ayaa booqday xarunta hal-abuurka iyo kobcinta ganacsiga teknoolijiyada ee SIMAD Innovation Lab.

Maamulka Jaamacadda SIMAD ayaa la wadaagay Maareeyaha horumarka ay ku tallaabsatay xarunta si kor loogu qaado xirfadaha dhallinyarada ee tknoolijiyada.

Tani waxay qeyb ka tahay qorshaha istaraatiijiga ah ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ee ku aaddan horumarinta xirfada isgaarsiinta iyo teknoolijiyada, taas oo ka qeyb qaadanaya sare-u-kaca dhaqaalaha dalka.






Dakhliga Isgaarsiinta oo kordhay

Warbixinta Waxqabadka Miisaaniyadda sannadkii 2022 ee ay soo saartay Wasaaradda Maaliyadda ayaa lagu sheegay in lacag dhan \$4.10 milyan laga soo aruuriyey adeeg-bixiyaasha hirarka Isgaarsiinta dalka iyadoo bartilmaadka ay wasaaraddu horey u dejisay na uu ahaa \$1.73 milyan, taasoo ka dhigan in dakhligu kordhay 236.3% filashadii sanadki hore. sidoo kale waxay lacagtan soo xarootay ka badan tahay 255.7% lacagtii soo xaroon jirtay sanadihii la soo dhaafay..

Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, mudane Mustafa Yaasiin Sheekh ayaa ku tilmaamay kororka dhakhligaas guul weyn oo ay hay'addu soo hoyisay iyo dadaal badan oo ay ku bixiyeen sidii loogu hoggansami lahaa shuruudaha ruqsadaha Isgaarsiinta oo ay shirkaduhu ruqsadda shaqo ku qaateen.

“Waan ku faraxsannahay in qorshihii aannu u dejinay shirkadaha Isgaarsiinta in mira-dhalkiisu aannu ku aragno dhowr bilood gudahood” ayuu yiri Maareeyuhu

Korarka dhakhligan ayaa soo xarooday rubuc dhamaadkii sanadkii tegay ee 2022. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo dhowaan ku guuleysatay shahaadada Caalamiga ah ee hufnaanta maamulka ee **ISO 9001:2015** ayaa rajeyneysa in dakhliga Isgaarsiintu uu sii kordho inta sanadka ka harsan.



Ololaha TikTok

Ka Waddo Dalkeena

#WadajiraaBadqaba



“Waxaan aqoonsan nahay uguna mahad celinaynaa TikTok bilaabista barnaamijyada wacyigelinta isticmaaleyaasha ku nool Soomaaliya ayadoo adeegsanaysa halkudhiggeeda #WadajiraaBadqaba.”

Mustafa Yaasiin

farsamooyinka Tiktok si ay uga caawiso ka-hortaga waxyaabaha khatarta badan, gaar ahaanna waxyaabaha dhiirigelinaya argagixisada iyo falalka sharci darrada ah.”

“Waxaan aqoonsan nahay uguna mahad celinaynaa TikTok bilaabista barnaamijyada wacyigelinta isticmaaleyaasha ku nool Soomaaliya ayadoo adeegsanaysa hal-kudhiggeeda #WadajiraaBadqaba” ayuu yiri Maareeyuhu oo intaa raaciyay “Markii aanu si wadajir ah u wada shaqeyno, waxaan abuuri karnaa dadkana bari karnaa talaabooyinka badqabka ee ku habboon dhammaan da’aha kala duwan iyo in aan ka difaacno isticmaaleyaasha khatarta wajihi karta islamarkaana innagoo dhiiragelineyna waxyaabaha wacyigelinta iyo hal-abuurka leh kuwaasoo ixtiraamaya dhaqanka, mabaadii’da, iyo caadooyinka bulshadeena.”

Ololaha TikTok oo isticmaalaya hashtagga #Wadajiraabadqaba ayaa adeegsanaya barnaamijyo wacyigelin oo la xiriiira badqadka madasha Tiktok kuwaasoo baahintoodu ay ka socoto qaar kamid ah Idaacadaha iyo taleefishinada dalka iyo akoonnada dad saameyn ku leh madasha Tiktok si loo gaaro dhageystayaal balaaran.

Wuxuuna Ololaha bixin doonaa talooyin ku saabsan sida loogu badqabi karo madasha Tiktok, sida loo dacweyn karo waxyaabaha aan dhaqan iyo anshaxa ahaan habboon, falalka argagaxisada iwm.

Ugu dambeyn, Hay’adda Isgaarsiinta Qaranka waxay ku dhiirigelinayaan dhammaan isticmaalayaasha TikTok ee Soomaaliya inay ka qaybqaataan ololahan muhiimka ah oo ay qaadaan tillaabooyin ay ku hubinayaan badqabkooda iyo badbaadada dadka kale ee adeegsada madashaas.

Hay’adda Isgaarsiinta Qaranka Soomaaliya (HIQ) oo walaac xooggan ka muujineysa caqabadaha sii kordhaya ee la xiriiira badbaadada internetka ee dalka ayaa qaadday tallaabooyin lagu horumarinayo badqabka internetka.

Si haddaba arrimahan wax looga qabto, waxay hay’addu si firfircooni ku dheehan tahay u bilowday wadhadallo ay la yeelanayso shirkadaha waaweyn ee Baraha Bulshada, oo ay ku jiraan TikTok, Twitter, Facebook, iyo Telegram.

Shirkadda TikTok, oo hoggaanka u qabatay baraha bulshada ee lala xiriiiray, ayaa durba dalkeenna ka bilowday olole ku saabsan badqabka Online-ka taasoo looga jawaabay dadaalkan ay Hay’addu wado. Ololahan oo bilowday bartamihii bisha Juun ayaa looga gol-leeyahay in lagu wacyigaliyo dhammaan ummada Soomaaliyeed ee isticmaasha madasha TikTok gaar ahaan da’yarta.

Mustafa Yaasiin Sheekh, Maareeyaha Guud ee Hay’adda, ayaa tilmaamay muhiimadda ay leedahay hawshan wada shaqayneed ee HIQ iyo TikTok, waxaanu yiri, “Waxaan muhiimad siinaynaa wada shaqeynta u dhexaysa TikTok iyo Hay’adda Isgaarsiinta Qaranka ee ku aaddan xaqijinta in isticmaaleyaasha aaladu ay aqoonsadaan islamarkaana adeegsadaan

#WadajiraaBadqaba

Talooyinka badbaadada Internet-ka

01

Ilaali Xogtaada Gaarka ah

Ka fogow in aad qof kale bartaada kula wadaagtid xogtaada gaarka ah, sida magacaaga oo dhameystiran, ciwaankaaga, lambarka Taleefankaaga, ciwaanka iimaylka, goobta shaqada.

02

Iska ilaali dadka kugu cusub.

Ka digtoonow la macaamilka dadka aadan aqoonin. Ka fogow la wadaagidda macluumaadka gaarka ah, la kulanka dadka aad online-ka uun aad ku aragtay, ama in aad aqbasho codsiyada isticmaalayaasha aadan garanayn.

03

Isticmaal (Password) Adag

Si aad u abuurto lambar-sireed adag isticmaal xarfo, lambaro iyo calaamado isku jira, si aad u sameysid lambar-sireed aan la saadaalin karin. Akoonkaadaada baraha bulshada u isticmaal ama ku xiro had iyo jeer lambar-sireed cusub.

04

Ka fakir kahor inta aadan xog faafinin

Ka fiirso cawaaqibta ka imaan karta qoraallada iyo muuqaallada ka hor inta aadan la wadaagin bulshada. Ogow marka aad wax dhigto baraha bulshada, in ay arki karaan oo ay wadaagi karaan dadka kale, xitaa haddii aad isla markiiba ka saarto.

05

Dacwad ka gudbi waxyaabaha aan habboonayn

Haddii aad la kulanto wax kasta oo aan habboonayn, sida dhaqan xumo, hanjabaad ama qof ku xadgudbaya xeerarka. Fadlan dacweey. Haddii aad la kulanto isticmaale ku lug leh dhibaataaynta, handadaad, iyo nooc kasta oo dhaqan xumo ah, iska xannib/xir oo dacweey.

06

La soco wixii soo kordha ama cusub

La soco markasta wixii ku cusub tilmaamaha badqabka, sida; siyaasadda bulshada iyo wixii isbedel ah ama cusubooneysiin ah oo ku yimaada barta aad isticmaasho. Sidoo kale la soco khatarta kaaga imaan karta iyo hababka ugu wanaagsan ee loo isticmaalo internet-ka si bad-qab ah.

07

Qari Xogtaada

Dib u eeg oo qari xogtaada gaarka ah ee akoonkaadaada.

Diiradda saar inaad ka dhigto akoonkaada baraha bulshada mid gaar ah si dad kaliya ee kugu xiran ay u arkaan xogtaada.

08

Noqo qof Xushmad iyo Ixtiraam Badan

Dadka ula dhaqan si xushmad iyo ixtiraam leh si uu u wanaagsanaado is-dhexgalka bulshada.

Iska ilaali inaad ku lug-yeelato hadallada nacaybka ah, iyo nooc kasta oo dhibaataayn ah.

09

Maareey/Xakameey Waqtiga Shaashada

Ka digtoonow waqtiga shaashaddaada oo iska hubi inaysan si xun u saameyn dhinacyada kale ee noloshada.

Jadwal ama waqti cayiman/go'an u sameyso isticmaalka shaashadda oo ka naso mobile-ka.



Adeegga Isku-xirka Shirkadaha Isgaarsiinta



Maarso, 2023

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka, Mudane Xamse Cabdi Barre, ayaa si rasmi ah u daahfuray hirgelinta adeegga isku-xirka shirkadaha isgaarsiinta dalka.

Munaasabadda lagu daahfurayay adeeggan oo lagu qabtay Muqdisho ayaa waxaa ka soo qeybgalay Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda, xubno ka tirsan Golaha Wasiirrada, Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta, madax ka socotay shirkadaha isgaarsiinta ee shatiyada haysta (Hormuud, SomTel, Golis, Telesom, Amtel, iyo SomLink), iyo marti sharaf kale.

Adeegga ayaa hadafkiisu yahay sidii loo dabooli lahaa baahida dadweynuhu u qabaan inay isla xiriiri karaan iyagoo isticmaalaya shabakado kala duwan.

Maareeyaha guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, oo ka hadlay munaasabadda ayaa sheegay in tallaabadani tahay guul u soo hoyatay isgaarsiinta Soomaaliyeed, taasoo kor u qaadi doonta tartanka suuqa isgaarsiinta, "Adeegani wuxuu dhimi doonta qiimaha isgaarsiinta, taasoo fursad siin doontaa macaamiisha inay kala doortaan adeegyo kala duwan" ayuu yiri Maareeyuhu.

Maareeyahay oo hadalkiisa sii wata aya yiri "Isku-dayga ah in la isku xiro shirkadaha dalka waxaa la sameeyay laba mar oo hore oo kala ahaa sannadihii 2000 iyo 2014kii, hase yeeshee heshiisyadaasi way burbureen wax yar kaddib, maaddaama aysan jirin shuruuc iyo hay'ado hirgeliya. Balse haatan waxaa jira shuruucdii iyo xeerarkii lagu nidaamiyay isku-xirka shirkadaha, isla markaana Hay'addu waxaa ka go'an inay korjoogteyso hirgelinta isku-xirka." ayuu hadalkiisa sii raaciyey

Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Mudane Jaamac Xasan Khaliif oo goobta isagana ka hadlay ayaa ku bogaadiyey Shirkadaha Isgaarsiinta guushan ay gaareen, waxaana uu ku dheeraaday muhiimada Isgaarsiintu u leedahay kobcinta dhaqaalaha iyo horumarkeeda.

"Isku-xirka u dhexeeya lixda shirkadood waa talaabo horey loo qaaday oo dhinaca horumarinta adeegga Isku-xirka iyo hal-abuurka qeybta Isgaarsiinta. Waxaan ku dhiirigelinayaa shirkadaha iney sii wadaan wada-shaqeynta dhexdooda ah si ay adeegyada ugu wanaagsan ay u muwaadiniinta u helaan sidookale uga qeyb-qaataan kobaca dhaqaalaha dalka." ayuu yiri



Ugu dambeyntii, R/Wasaaraha XF, Mudane Xamse Cabdi Barre ayaa bogaadiyey kaalintii ay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka iyo Shirkadaha Isgaarsiintu ku lahaayeen hirgelinta adeegga isku-xirka shirkadaha, wuxuuna xusay sida ay dowladda uga go'an tahay horumarinta hal-abuurka iyo tartanta suuqa isgaarsiinta. "fulinta adeegga Isku-xirka waa guul muhiim ah, waxaan ku ammaanayaa shirkadaha Isgaarsiinta howlkarinimada iyo dedaalka ay muujiyeen, waxaan ku dhiirigelinayaa inay sii wadaan wada-shaqeynta ay ugu faa'iideynayaan muwaadiniinteenna" ayuu yiri R/wasaaruhu

guushan la gaaray ay daliil u tahay sida ay Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka uga go'an tahay inay nidaamiso qeybaha Isgaarsiinta iyo Teknoolojiyadda dalka, si kor loogu qaado hal-abuurka iyo tartanka suuqa.



Qiimaha Adeegga Isgaarsiinta

Maarso, 2023

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa kulan wadatashi ah oo labo maalmood qaatay la yeelatay shirkadaha isgaarsiinta ee ruqsadda heysta, waxaana kulanka looga wada hadlay arrimo muhiim ah oo la xiriiira qiimaha adeegga isgaarsiinta, gaar ahaan qiimaha tafaariiqda ee adeegyada isgaarsiinta dalka.

Maareeyaha HIQ, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, oo kulanka daahfuray ayaa ku dheeraaday muhiimadda uu tartanka u leeyahay kobaca isgaarsiinta dalka.

"Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay u xilsaaran tahay ilaalinta iyo hubinta in si caafimaad qab leh u hirgalo suuqa xorta ah ee isgaarsiinta" ayuu yiri Mudane Mustafa, oo xusay in suuqa xorta ah uu fursad u yahay cid kasta oo soo galaysa suuqa isgaarsiinta, isla markaana ay macaash ka samayn karto.

"Waxaan idinku dhiirigelinayaa in si mas'uuliyad ku dheehan tahay uga doodaan, xal suurtoogalka ah u keentaan arrinta qiimaha adeegga Isgaarsiinta, adinkoo tixgeliya duruufaha macaamiisha" ayuu yiri Mudane Mustafa, wuxuuna kula dardaarmay in go'aan ka gaaridda qiimaha adeega isgaarsiinta uu noqdo mid laga wada tashado.



Shirkadihii kulanka ka qeybgalay ayaa isku raacay in qiimaha adeegyada isgaarsiinta ay tahay arrin taagan, oo loo baahan yahay in xal loo helo.

Labadii maalmood ee kulanka uu socdayna waxaa la falanqeyay oo laga dooday arrimo badan oo khuseeya xalka suuragalka ee qiimaha adeegyada isgaarsiinta iyadoo lagu ballamay in wada-hadalka shirkadaha dhaxdooda uu sii socdo iyadoo hay'adduna dib u eegis ku sameyn doonto fekradaha ay soo jeediyaan.

MARXALADIHII HIRGELINTA

Isku-xirka Shirkadaha Isgaarsiinta

Iyadoo la fahansan yahay sida adeegga Isku-xirka uu lama huraan ugu yahay dhiirrigalinta tartanka suuqa xorta ah, Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) waxay awood u yeelatay inay Soomaaliya ka hirgeliyo Isku-xirka Shirkadaha Shatiga Isgaarsiinta leh. Tani waa geeddi-socod soo billowday 2018-dii balse aan si wanaagsan u socon caqabado dhowr ah dartood.

Qoraalkan waxay diiradda saaraysaa habka iyo tillaabooyinka loo qaaday hirgelinta Isku-xirka. Qoraalku wuxuu soo koobayaa tillaabooyinka la qaaday si Isku-xirka looga dhigo mid waxtar leh.

Sharciga Isgaarsiinta Qaranka ee 2017 ayaa lagu aasaasay HIQ ujeeddaduna waxay ahayd shati siinta iyo nidaaminta qeybta isgaarsiinta iyo teknoolojiyadda dalka. Si gaar ah, sharcigu waxa uu farayaa HIQ inay xeerar ka sameyso dhowr meelood oo cayiman kuwaas oo muhiim u ah habsami u socodka hawlaha isgaarsiinta iyo teknoolojiyadda.

Mid ka mid ah waxyaabaha lagama maarmaanka u ah dhiirrigalinta tartanka iyo habsami u socodka shaqada suuqa isgaarsiinta ayaa ah hirgelinta adeegga Isku-xirka. Qodobbada 49-53 ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka ayaa si gaar ah u siinaya HIQ awoodda ay ku qaadanayso xeer-nidaamiyeyaal iyo hab-raacyo ku aaddan Isku-xirka u dhaxeeya Shirkadaha Shatiga Isgaarsiinta leh waxa uuna tilmaamaya arrimo gaar ah oo ay tahay in ay HIQ wax ka qabato.

Soomaaliya waxaa adeegga Isku-xirka laga hirgeliyay labo jeer, waxaana ugu dambaysay sannadkii 2014-kii kaddib markii heshiis ay wada gaareen saddex shirkad isgaarsiineed. Nasiib darro, heshiiskani ma sii waarin, shirkadihiina waxay ku qasbanaadeen in ay kala xirtaan qadadkooda sababo isku-dhacyo iyo xeerar maamul la'aan dartood.

Markii HIQ la aasaasay 2018-dii, waxay ka yeeshay adeegga Isku-xirka arrin mudnaan u leh isgaarsiinta. Si geeddi-socodku looga dhigo mid guuleysta, HIQ waxay ka shaqeysay:

- Dejinta qaab-dhismeedka xeer, ganacsi, iyo kan sharci ee hirgelinta Isku-xirka.
- Qabanqaabinta shirar wada-tashi oo dhowr ah kuwaas oo shirkaduhu ay kaga hadleen arrimaha la isku hayo iyo siyaabaha suurtagalka ah ee wax looga qaban karo.
- Qabanqaabinta dhowr aqoon-isweydaarsiyo awood-dhis ah oo shirkaduhu ay fursad u heleen inay khubarada caalamiga ah kala hadlaan siyaabaha suurtagalka ah ee loo hirgeliyo karo adeegga isku-xirnaanta.



GEEDDI-SOCOD SANNADEEDKII

Hirgelinta Isku-xirka Shirkadaha Isgaarsiinta

2000

Adeeg Isku-xir ayaa u dhaxeeyay Al-barakat, AStel, Olymbic iyo Nationlink, kaasoo ugu dambeyntii go'ay.

2014

Adeeg Isku-xir ayaa u dhaxeeyay Hormuud, Nationlink iyo Somtel kasoo isna ugu dambeyntii go'ay.

2017

Sharciga isgaarsiinta Qaranka ayaa la ansixiyay.

2018

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa la dhisay.

2020

- Xeerka Isku-xirka ayaa dib loo qaabeeyay.
- Tilmaamaha Farsamada ee Isku-xirka ayaa la diyaariyey.
- Qabyo-qoraalka Xeerka Isku-xirka iyo Xeerka Xalinta Khilaafaadka Isku-xirka, ayaa inta la mideeyay laga dhigay hal dukumeenti oo loo yaqaan "Xeerka Isku-xirka".

2021

- Waxaa la diyaariyey Nidaamka Diiwaangelinta Heshiiska Isku-xirka.
- Waxaa talo-bixin dadweyne la geliyey dukuumiintiyada Isku-xirka.
- Hay'adda waxay qabatay aqoon-isweydaarsi cinwaan looga dhigay "La dagaalanka Khiyaanadda xagga isgaarsiinta iyo Adeegga Isku-xirka".
- HIQ waxay martigelisay shirar dhowr oo ay la yeelatay Shirkadaha Isgaarsiinta si ay uga wada hadlaan Xeerka Isku-xirka iyo hirgelintiisa.

2022

- HIQ waxay qabatay aqoon-isweydaarsi cinwaan kiisu ahaa: "Dhaqangelinta hirgelin wax ku ool ah oo la xiriiirta xeerka isku-xirka iyo wadaxajoodka shirkadaha.
- HIQ waxay martigelisay shirar dhowr ah oo ay la yeelatay shirkadaha isgaarsiinta si ay u dabagasho habsami u socodka hirgelinta adeegga Isku-xirka.
- Guddiga Maamulka HIQ waxay ansixiyeen qaab-dhismeedka nidaaminta Isku-xirka oo ay ku jirto Xeer-nidaaminta Isku-xirka.
- HIQ ayaa martigelisay wada-xaajood kaasoo shirkadaha Isgaarsiinta ee ruqsadda leh kaga wada hadlayeen qiimaha adeegga Isku-xirka (MTR).
- HIQ ayaa soo gudbisay gunaanudka wada-tashiyada Isku-xirka, kaddib na HIQ iyo Shirkadaha Isgaarsiinta Shatiga u heysta ayaa kala saxiixday Heshiiska Isku-xirka.
- Amtel iyo Somlink ayaa heshiiska Isku-xirka kala saxiixday una soo gudbiyey HIQ, hadana waxay hirgeliyeen adeegga Isku-xirka

2023

- Hormuud iyo Golis, hore ayuu u jiray Isku-xirkooda shabakadaha, balse ma shaciyeyneyn, haatanse heshiiska isku-xirka kaddib waa ay sharciyeeyeen.
- Hormuud iyo Somtel ayaa sidoo kale heshiiska Isku-xirka kala saxiixday una soo gudbiyey HIQ, haddana waxay fuliyeen adeegga Isku-xirka.
- Waxaa la daahfurka Adeegga Isku-xirka Shirkadaha Isgaarsiinta Dalka

Hirgelinta adeegga Isku-xirka waxay ahayd hawl dheer. Tani waxay la jaanqaadaysaa falsafadda HIQ ee ah dhisidda is-afgarad. Nidaamku wuxuu adeegsaday dhammaan siyaabaha la heli karo si loo gaaro ujeeddada Hirgelinta Adeeggan, iyadoo loo marayo kulamo wadatashi, awood-dhisid iyo fududaynta wada-xaajoodka u dhaxeeya shirkadaha. Intii lagu gudo jiray geeddi socodka, HIQ waxay martigelisay in ka badan 20 aqoon-is-weydaarsiyo, la-tashiyo, iyo shirar khuseeya hirgelinta adeegga Isku-xirka, iyada oo diiradda lagu saarayay kobcinta fahamka arrimaha farsamo iyo ganacsi ee la xiriiira adeeggan.

Si kastaba ha ahaatee, geeddi-socod dheer kaddib, HIQ waxay awood u yeelatay inay ku dhawaaqdo bishii Maarso ee sannadkan 2023 in inta badan shirkadaha dalka ay isku-xirmeen qadadkooda oo ay iswici-karaan. Waxaa hadda diiradda la saarayaa in la hubiyo in shirkad kasta oo shati isgaarsiin haysata ay ku xiran tahay dhammaan shirkadaha kale.

Tani ma noqon doonto dhammaadka sheekada sidaas darteed, HIQ waxay hubin doontaa in heshiisku yahay mid waxtar leh iyo in dadweynuhu ku raaxaystaan adeeggan. Si ay tani u dhacdo, HIQ waxay kor joogtayn doontaa fulinta heshiisyada ilaa mustaqbalka.

“

Isku-xirka shabakadaha ka sokow in uu yahay waajib sharci ah iyo xuquuq macmiil, haddana waa halbeeg muhiim u ah caafimaad qabka suuqa Isgaarsiinta iyo maalgelinta teknoloojiyad iyo addeegyo cusub, waxaana rajaynaynaa in heshiiskan oo soo afjari doono wadahadal la soo bilaawday as'aaskii Isgaarsiinta dalka

”



Mustafa Yaasiin Sheekh.

Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka



“Mabaa'ddi'da ay hay'addu ku shaqeyso waxaa asal u ah joogteynta dhexdhexaadnimada, madaxbannaanida shaqadeeda, kor joogteynta suuqa isgaarsiinta iyo dhaqangelinta sharciga Isgaarsiinta, iyo siyaasadaha Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada”.



We are now

ISO 9001: 2015

Certified



*Hay'adda Isgaarsiinta
Qaranka*

*oo heshey Shahaadada
ISO 9001:2015*

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
ayaa heshay Shahaadada
ISO 9001:2015, taasoo ka
dhigeysa hay'addii ugu
horreysay ee dowladda ee
hesha shahaadada ISO.



Si loo helo Shahaadada ISO, HIQ waxay martay hanaan qiimeyn ah oo ay ku jiraan horumarinta hab maamulka tayeysan, baaris iyo dib-eegis dukumentiyada habka maamulka iyo qiimeyn guud oo dhammeystiran.

“Farxad gaar ah ayay noo tahay inaan guddoonno shahaadadan caalamiga ee ISO, tanina waxay ka tarjumeysaa balanqaad joogto ah oo ay HIQ ku qaadaneyso dhaqamada ugu wanaagsan ee hab maamulka taysan. Waxay muhiim u tahay hirgelinta qorsheyaasha kor loogu sii qaadaayo hay'adda iyo soo bandhigidda isbeddel weyn oo ku yimaada hababka shaqada.” ayuu yiri Maareeyaha Guud ee HIQ, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, oo soo dhaweeyay guushan.


“Go'aanka aan ku buuxinay shuruudaha caalamiga ee hab maamulka tayeysan waxay muujineysaa sida ay nooga go'an tahay fududeynta iyo horumarinta isgaarsiinta iyo teknolojida dalka.” ayuu sii raaciyey hadalkiisa.

Shahaadada ISO 9001:2015 waxa abixiya Hay'adda Caalamiga ee Halbeegidda (International Standard Organization (ISO) oo ah hay'ad madax bannaan oo la aas'aasay sannadkii 1947-dii, waxaana uu halbeegideedu ku saleysan yahay mabaadi'da maareynta tayada oo ay ku jiraan daryeelidda macaamiisha, dhiirrigelinta iyo saameynta maamulka sare, habka geeddi-socodka shaqada, iyo horumarinta joogtada ah.

ILAAALINTA XUQUUQDA MACAAMIISHA

Sharciga Isgaarsiinta Qaranka wuxuu muhimad weyn siinayaa ilaalinta xuquuqda macaamiisha isticmaala adeegyada isgaarsiinta dalka. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxa ay dhaqangelisay xeernidaamiyeyal iyo hindiseyaal lagu ilaalinaayo xuquuqda macaamiisha isticmaasha adeegyadda isgaarsiinta ee shirkadaha dalka.

Si loo dhaqangeliyo qoddobada sharciga isgaarsiinta Qaranka ee ka hadlaaya ilaalinta xuquuqda macaamiisha, HIQ waxa ay diyaarisay arrimaha soo socda:




1 Shuruudaha Rukhsadda Isgaarsiinta: shuruudaha rukhsadda lagu siiyay shirkadaha isgaarsiinta waxaa ku jira qoddobo cad oo qeexaya ilaalinta xuquuqda macaamiisha oo ka mid yihiin:

a) Adeegga Caawinta Macaamiisha: shuruudaha rukhsadda isgaarsiinta waxa ay ku waajibineysaa shirkadaha in ay sameeyaan xafiisyo loogu adeego macaamiisha, cabashadoodana kusoo gudbiyaan, oo si degdeg ah loogu xaliyo.



b) Shuruudaha Tayada Adeegga Isgaarsiinta: shuruudaha rukhsadda waxaa ku jira qodobo ku waajibinaya shirkadaha in ay raacaan heerarka tayada adeegyada isgaarsiinta sida heerarka tayada wicitaanka iyo xawaaraha internet ka, si macaamiisha u helaan adeeg ay ku qanci karaan.



c) Heshiiska Adeegga: shuruudaha rukhsadda waxa ay kaloo ku waajib yeelayaan shirkadaha in ay bixiyaan adeeg huban oo dad oo idil u siman yihiin, qaabka tariifooyinka qiimaha na ay cad yihiin, macaamiishana si cad loogu sheego qiimayaasha iyo tariifooyinka.

2 Xeernidaamiyaha Ilaalinta Xuquuqda Macaamiisha:

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxa ay diyaarisay Xeernidaamiyaha Ilaalinta Xuquuqda Macaamiisha, iyadoo sidoo kale sameysay hab fudud oo ay macaamiisha kuso gudbin karaan cabashadooda. Cabashooyinka loo soo gudbiyo hay'adda waxa ay la wadaagtaa shirkadaha laga soo gudbiyay, loona qabtaa waqti ay ku soo xaliyaan.



Sidoo kale, HIQ waxa ay diyaarisay qorshaha istiraatiijiyadda 2023-2027 kaas oo cadeynaya howlaha looga baahanyahay HIQ si loo xoojiyo shuruucda ilaalinta xuquuqda macaamiisha, looga hor tago dhaqamada ganacsi ee aan cadaaladda ku dhisneen.

Habka ilaalinta macaamiisha waxaa loogu talagalay in lagu dhiso xiriir caddaalad ah oo dheellitiran oo ka dhexeeya adeeg bixiyeyaasha iyo macaamiisha. Waa qaabdhismeed dhamaystiran oo wax looga qabanayo dhinacyada kala duwan ee xuquuqda macaamilka, qiimeynta tayada adeegga, sirta, iyo xallinta khilaafaadka.

Ilaalinta Xuquuqda macaamiisha waxaa aasaas u ah tiirarka soo socda:



1. Sharciga Isgaarsiinta Qaranka 2017, oo ah aasaaska sharci ee lagu nidaamiyo suuqa isgaarsiinta, ilaalinayana xuquuqda macaamiisha, siinayana HIQ awood sharci oo ay ku fuliso xeernidaamiyeyaasha si hufan.

2. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo mas'uul ka ah ilaalinta iyo fulinta xeernidaamiyeyaasha ilaalinta xuquuqda macaamiisha.



4. Tayada Heerarka Adeegga.
5. Ilaalinta Xogta Macaamiisha si waafaqan sharciga ilaalinta xogta.
6. Fulinta iyo saaridda ganaaxyo ka dhasha ku xadgudbidda sharciga.



3. Ilaalinta Xuquuqda Macaamiisha oo leh qaabdhismeed ballaaran oo qeexaya xuquuqda macaamilka ee adeegyada isgaarsiinta. Xuquuqyadaas waxaa ka mid ah helidda adeegyo la awoodi karo oo na la isku halleyn karo, tariifooyin cadaalad ku dhisan, tayada adeegga, ilaalinta sirta iyo xogta macaamiisha, iyo hab cad oo lagu xaliyo khilaafaadka ka dhex dhasha shirkadaha iyo macaamiishooda.



KORUQAADIDDA XIRFADDA SHAQAALAHA

Janaayo, 2023

Iyada oo taageero laga helayo Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada iyo Midowga Isgaarsiinta Adduunka (ITU) ayay u suuragashay in qaar ka tirsan shaqaalaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ay labo tababarro kala duwan ku soo qaataan magaalada Nairobi ee dalka Kenya.





Labadan tababar ayaa khuseeyay Maareynta Jeegaanta iyo Amniga Internet-ka (Spectrum Management and Cybersecurity) taasoo ujeeddadiisu ahayd in shaqaalaha lagu tababaro xirfadaha lagama maarmaanka u ah sidii loogu hortegi lahaa khataraha amniga internet-ka ee sii kordhaya iyo sidii loo horumarin lahaa hab-dhaqanka maareynta jeegaanta iyo hirarka.

Tababarkan oo shaqaalaha hay'adda ay ku wehliyeen qaar ka tirsan shaqaalaha Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyadda ayaa waxaa bixinyay khabiirro ku xeeldheer hab-dhaqannada ugu wanaagsan ee laga adeegsado Maareynta Jeegaanta iyo Amniga Internet-ka.

Gebo-gabadi labadaan tababar kaddib, howladeenadii hay'adda ee ka qeybgalay ayaa sheegay iney wax badan ka faa'iideen taasoo saameyn togan ku

yeelaneyso qorshaha hay'adda ee Jeegaanta iyo Amniga Internet-ka.

"Tababarkan aad baan ugu faa'iiday, waxaan baranay xirfado aan ku maareyno kheyraadka Jeegaanta iyo ahmiyadda uu u leeyahay qarankeenna. Waxaa la inagu tababaray dhinacyada heerarka raadiyaha iyo shuruudaha isticmaalka jeegaanta oo ay ka mid yihiin: ka faa'iidaysiga bandwidth, hufnaanta isticmaalka, farsamooyinka wax-ka-beddelka, qorshayaasha soo noqnoqda, isdhexgalka (interference) raadiyaha, iyo falanqaynta dhaqaalaha jeegaanta." Ayuu yiri Maxamuud Cabdi Maxamuud oo ka tirsan hay'adda kana qeyb galay tababarka Maareynta Jeegaanta.

"Tababarku waxa uu inoo soo bandhigay qaar ka mid ah hab dhaqannadaa ugu horumarsan ee dhinaca amniga internetka. Waxaan aaminsanahay in aqoonta aan ka helnay tababarkan ay naga caawin doonto inaan si wax ku ool ah u ilaalino internet-ka Soomaaliya" ayuu yiri Cabdullaahi Maxamed Abiikar oo isagana ka mid ah shaqaalaha hay'adda ee ka qeybgalay tababarka Amniga Internet-ka.

Tababaradaan waa talaabooyiin muhiim ah kuwaasii oo qeyb ka ah dadaalada Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ay ku hormarineyso howladeenadeeda ka shaqeeya waaxyaheeda kala duwan ee hay'adda.



SOMNET, BLUECOM &

SOON OO rukhsadihii qaatay

May, 2023



Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa guddoonsiiyay Shirkadaha SOMNET, Bluecom iyo SOON rukhsado isgaarsiineed oo kala duwan..

Shirkadda SOMNET ayaa la guddoon siiyay ruqsaddii ugu horreysay ee Mobile Virtual Network Operator “MVNO” taasoo ah isgaarsiin aan lahayn kaabayaal isgaarsiineed, laakiin isticmaala kaabayaasha, lambarada iyo hirarka, shirkadaha kale ee isgaarsiinta.

Sidoo kale shirkaddaha Bluecom iyo SOON oo ka mid ah shirkadaha bixiya adeegga internet-ka, ayaa la guddoonsiiyay ruqsadda adeegga Internet-ka ee Application and Service Provider (ASP).

Maareeyaha Guud ee HIQ oo ka hadlay shati qaadashada shirkadahaan ayaa yiri “Waxaan aad ugu faraxsannahay in aannu Shirkaddaha SOMNET, Bluecom iyo SOON guddoonsiinno ruqsaddahan kala duwan oo u gogol xaaraysa in shirkadahaan ay shacabkeenna u fidiyaan adeegyo casri ah oo qiimo jaban.”

Guddoonsiinta rukhsadahaan ayaa qeyb ka ah sida ay hay'adda uga go'an tahay iney nidaamiso suuqa isgaarsiinta, islamarkaana abuurto jawi suuq isgaarsiin oo u furan maalgashi, kaasoo shacabka Soomaaliyeedna u suuragelinaya in ay ka helaan adeegyo kala duwan oo isgaarsiinta iyo teknolojiyada ah.



Bluecom

NCA IYO NTRA

Hay'adaha Isgaarsiinta Soomaaliya iyo Masar oo Iskaashi dhinacyo kala duwan yeelanaya



Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka iyo Hay'adda Isgaarsiinta Masar ayaa yeeshay kulankoodii ugu horreeyay ee Iskaashi kaasoo looga hadlay mowduucyo kala duwan oo khuseeya jeegaanta iyo maareyntooda.

Kulankan oo qaab fogaan arag ah u qabsoomay ayaa waxaa ka soo qeybgalay howlwadeenanda Waaxyaha Jeegaanta ee labada hay'addood, waxaana uu kulankan bilow u noqon doono kulamo kale oo iskaashi oo dhexmara waaxyaha kala duwan ee labada hay'addood.

Iskaashigan dhexmaraya labada hay'addood ayaa yimid kaddib heshiis is-afarad ah oo bishii Janaayo ee sannadkan ay kala saxiixdeen Wasiirka Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Mudane Jaamac Xasan Khaliif, iyo dhiggiisa dalka Masar, Mudane, Cumar Dalcat, waxaana heshiiskan looga gol leeyahay in sare loogu qaado iskaashiga dhanka isgaarsiinta iyo sare u qaadista isdhaafsiga khibradaha iyo aqoonta farsamada.



Rukhsada Hirarka Isgaarsiinta

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka waxay ku wargelineysaa dhammaan shirkadaha in qalabka ku shaqeeya hirarka isgaarsiinta looga baahanyahay in ogolaansho laga helo Hay'adda si dalka loogu adeegsado, loogana fogaado isdhexgalka hirarka. Keenidda iyo adeegsiga qalab ku shaqeeya hirar oo aan ogolaansho heysan waxaa ka dhalaneysa cawaaqib sharciyeed.



P.O Box 55, BN 03010
Mogadishu - Somalia

VISIT OUR WEBSITE:
www.nca.gov.so

f @SomaliaNCA



Dib u Cusboonaysiinta Rukhsada Hirarka Isgaarsiinta

Hay'adda waxay ku wargelinaysaa shirkadaha heysta rukhsada hirarka Isgaarsiinta in ay u soo gudbiyaan codsiyada cusboonaysiinta rukhsada, ka hor inta uusan dhicin muddada rukhsada.


Ujeedka wargelintaan waxaa looga dan leeyahay in laga fogaado ciqaabta sharciga ah ee ka imanaysa adeegsiga Hirarka Isgaarsiinta ee aan rukhsada lahayn sida ku xusan Sharciga Isgaarsiinta.

P.O Box 55, BN 03010, Mogadishu Somalia
www.nca.gov.so



Internet Protocol Version 6 oo Soomaaliya laga hirgelinayo

April 2023



Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) iyo Midowga Isgaarsiinta Adduunka (ITU) ayaa si wadajir ah u soo qabanqaabiyey aqoon-isweydaarsi fogaan-arag ah, hadafkiisuna ahaa dejinta Istaraatiijiyadda Baratakoolka Internet-ka Nooca Lixaad (Internet Protocol Version 6) ee Soomaaliya.

Aqoon-isweydaarsigan oo soconayay muddo labo maalmood ah ayaa waxaa isugu yimid qeybaha kala duwan ee hey'adaha dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay ee ka shaqeeya arrimaha teknoolojiyada iyo isgaarsiinta, sidoo kale waxaa ka soo qaybgalay bahda waxbarashada iyo ururrada bulshada rayidka.



Mustafa Yaasiin

“Adeegsiga Baratakoolka Internet-ka Nooca Lixaad (IPv6), wuxuu lamahuraan u yahay ammaanka iyo kobaca Internet-ka, maddaama laga helayo cinwaanno IP ah oo aad u ballaaran iyo adeegyo cusub” ayuu yiri Maareeyaha Guud ee HIQ, Mudane Mustafa Yaasiin, oo inta ku daray in isticmaalka IPv6 uu inoo suuragelin doono la jaanqaadidda horumarka teknoolojiyada casriga ah ee caalamka, taasoo kor u qaadeysa mustaqabalka dhaqaalaha dhijitaalka ah ee Soomaaliya. Wuxuuna uga mahadceliyey Midowga Isgaarsiinta Adduunka (ITU) qabsoomidda aqoon-isweydaarsigan iyo taageeradeeda joogtada ah ee dhinacyada farsamada iyo khibradda



Caadil Darwiish

Madaxa ITU ee dalalka Carabta, Mudane Caadil Darwiish, ayaa isna la hadlay ka soo qeybgalayaasha, isagoo iftiimiyey muhimadda ay leedahay wadashaqeynta iyo isku-xirnaanta u dhaxeysa dhammaan dhinacyada ay khuseyso horumarinta istaraatiijiyadda IPV6.

Inta uu aqoon-isweydaarsiga socday, ka qeybgalayaashu waxay dib-u-eegis ku sameyeen heerka uu hadda marayo qaadashada IPV6 ee Soomaaliya, waxayna qeexeen caqabadaha iyo fursadaha, iyagoo sidoo kale dejiyey khariidad loogu talagalay hirgelinta IPV6 ee dalka.



Dr. Navaneethan Arjuman

Aqoon-is-weydaarsigan oo uu hoggaaminayo Dr. Navaneethan Arjuman, oo ah khabiir ku takhasusay teknoolojiyadda IPv6, ayaa ugu dambeyntii waxaa ka soo baxay khariidad loogu talagalay in dalka loogu hirgeliyo IPv6, taasoo oo loo soo bandhigi doono dhinacyada ay khuseyso si wadatashi dheeraad ah looga sameeyo.



MUHIMADDA

IPv6

Internet Protocol Version 6

Isgaarsiinta iyo teknolojiyada guud ahaan, iyo Internet-ka, gaar ahaan waxay kaalin muhiim ah uga jiraan dhammaan qaybaha kala duwan ee nololshaha casriga ah ee bani'aadamka. Adeegyo dowladeed, ganacsi iyo kuwo bulsho oo badan ayaa laga helaa oo laga isticmaalaa Internet-ka.

Kaabayaasha teknolojiyada ayaa gundhig u ah in la suurtagliyo adeegyo ICT caalami ah, joogto ah, la wada heli karo, islamarkaasna la wada awoodo. Qaybaha ICT-da waxaa ay leeyihiin tilmaamaha isbeddel teknolojiyadeed oo degdeg ah iyo isu-keenidda teknolojiyada kala duwan si ay u wada shaqeeyaan, loona helo meel adeegyadooda laga wada heli karo.

Waddamada ku jira Midowga Isgaarsiinta Aduunka (ITU) ayna ka mid tahay Jamhuuriyadda Soomaaliya waxay go'aamiyeen in lagu dhiirgaliyo waddamada soo kobcaya isticmaalka IPv6, iyo in la fududeeyo ka guuritaanka IPv4 iyadoo loo guurayo IPv6, si loogu diyaar garoobo duni isku-wada xiran.

Faa'iidada IPV6



Baratakoolka Internet-ka (Internet Protocol) waa kaabaha isgaarsiineed ee uu ku dhisan yahay Internetku. Waxa uu suurtageliyaa in xogtu u kala gudubto dhinacyada ku xiriirsan shabakadda Internetka, la'aantiisna ma jiri lahayn Internet.

Hadda, waxaa la isticmaalaa nooca 4-aad (Internet Protocol Version 4) oo gaaray xaddigii ugu badnaa ee 4.3 bilyan oo cinwaan ama agab ka ku xiran internet-ka.

Nooca 6-aad (IPv6) ayaa ah faca xiga oo aad u ballaarinayaa qalabka ku xirmi kara Internet-ka. IPv6 waa hal-abuur muhiim u ah walxaha-ku-xiran Interent-ka (IoT), qalabka iyo agabyada kale ee ku jira shabakadda Internetka oo marba marka ka sii dambaysa sii badanaya taas oo uusan baahidooda dabooli karin nooca 4-aad ee Internetka(IPv4).

Faa'idooyinka IPv6, waxaa ka mid ah:

1 Wuxuu xal u noqonayaa dhibaata caalamiga ah ee ka jirta cinwaannada Internet-ka nooca 4-aad oo sii dhamaanaya, iyo baahida sii kordhasya ee agabyada ku soo xirmaya Internet-ka oo ay keenayso horumarka teknolojiyada.

2 Waxa uu suurtagelinayaa isku-hallayn iyo xawaare dheereeya oo keenaya in xogta si fudud ugu kala gooshto meelo kala duwan isku mar.

3 Wuxuu xoojinayaa sugnaanta aminga shabakadaha Internetka, iyada oo uu leeyahay habab dheeraad ah oo lagu sugayo saxnaanta xogta dhexmaraysa shabakadaha.

Yoolasha uu dajiyey guddiga Internet-ka ee Qarammada Midoobay ayaa tilmaamaya in waddamada soo kobcaya laga doonayo in sanadka 2025, dadka isticmaala internet-ka ay gaaraan 35%, taas oo muujinaysa korarka la filan karo ee agabyada iyo dadka ku xirmaya Internet-ka.

Si loo xaqiijiyo yoolasha horutabinta u leh Siyaasadda Qaran ee ICT-da (2019-2024) ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa laga maarmaan ah in la horumariyo kaabayaasha Interent-ka oo uu ka mid yahay in loo guuro isticmaalka IPv6. Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka oo kaashanaysa Midowga Isgaarsiinta Aduunka waxay ay samaynaysaa istiraatiijiyad looga guurayo IPv4, isla markaasna loogu diyaar garoobayo in la hirgaliyo IPv6, si Soomaaliya ay u horumariso adeegsiga Internet-ka.



STARLINK oo soo Dalbatay in ay SOOMAALIYA ka howlgasho

May, 2023

Kaddib kulan ay yeesheen Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) iyo Shirkadda Starlink ayay ku shaacisay Starlink iney daneyneyso ka howgalidda Soomaaliya, waxayna kulanka ku soo bandhigtay sida uu u shaqeeyo nidaamkooda Internet-ka kaasoo hore looga hirgeliyay 87 dal.

Kulankan ayaa waxaa ka qeybgalay Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh iyo madax ka tirsan qeybta Shatiga Caalamiga ah iyo Dhaqdhaqaaqa Suuqa ee Shirkadda SpaceX.

“Waxaan ku faraxsanahay inaan sharaxno sida uu nidaamkayagu u shaqeeyo, waxaan awoodno inaan u keeno Soomaaliya haddii aannu oggolaasho ka helno hay'adda, inagoo sidoo kalena wada-shaqeyn la yeelan doonna shirkadaha isgaarsiinta iyo kuwa internet ka bixiya ee ka howgala Soomaaliya” ayuu yiri Madaxa Qeybta Shatiga Caalamiga ah iyo Dhaqdhaqaaqa Suuqa ee Shirkadda SpaceX oo ka hadlay kulanka

Maareeyaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, oo kulanka ka hadlay ayaa dhankiisa soo dhaweeyay in Starlink ay daneyneyso iney ka howlgasho Soomaaliya.

“Marka hore Starlink waa iney soo buuxisaa shuruudaha rukhsadda ee looga baahanyahay, ay na soo martaa habraaca rukhsad soo codsashada ee Hay'adda. Hay'adda waxa ay qiimeyn doontaa dalabka shirkadda Starlink iyo qorshaha adeeg bixinta ee ay rabaan in ay ka hirgeliyaan dalka.”

Starlink waa shirkad bixisa internet dayax-gacmeed ah taasoo ay maamusho shirkadda SpaceX oo la aasaasay 2002. Adeegga Starlink ayaa qeyb ka noqon kara in uu kordhiyo dadka adeegsada Internet-ka dalkeenna si gaar ahaaneed goobaha ka fog magaaloyin oo aysan ka jirin adeegga Internet-ka.

Shirkadaha Isgaarsiinta oo la faray fulinta go'aannadii NAMLC



Maarso, 2023

Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka, Bangiga Dhexe iyo Xarunta Warbixinadda Maaliyadda ayaa si wadajir ula kulmay Shirkadaha Isgaarsiinta & Adeegyada Lacagaha Mobile-da. Kulankan ayaa diiradda lagu saaray sidii loo fulin lahaa go'aannadii Guddiga Qaran ee Ka-hortagga Lacag-dhaqidda & La-dagaalanka Maalgelinta Argagixisada (NAMLC) ee soo baxay 14-kii Febraayo 2023, kuwaas oo qaar ka mid ah ay khuseeyeen Shirkadaha Isgaarsiinta & Adeegyada Lacagaha Mobile-da.



Kulankan oo ka dhacay Muqdisho ayaa waxaa ka qeybgalay Maareeyaha HIQ, Md. Mustafa Yaasiin Sheekh, Guddoomiye ku-xigeenka Bangiga Dhexe ee Soomaaliya, Dr. Cali Yaasiin Wardheere, Agaasimaha Xarunta Warbixinadda Maaliyadda, Aamina Maxamed Cali iyo Madax ka socotay Shirkadaha Isgaarsiinta & Adeegyada Lacagaha Mobile-da.

“Kulankan ayaa waxaa looga hadlay hirgelinta go'aanadii ay soo saartay Guddiga Qaran ee Ka-hortagga Lacag-dhaqidda & La-dagaallanka Maalgelinta Argagixisada (NAMLC), go'aanadaas waxaan hore ugu gudbinay shirkadaha Isgaarsiinta, dhammaantoodna waxay soo dhaweyeen in nagala shaqeyn doonaan fulinta go'aanadda” ayuu yiri Maareeyaha HIQ, oo saxaafadda la hadlay.

“Waxaan ku farraxsannahay sidoo kale in wada-shaqeyn wanaagsan ee naga dhaxeyso shirkadaha Isgaarsiinta dalka, waxaana rajeynayaa oo aan ku hanweynahay in dhammaan go'aamada NAMLC ka soo baxay lagu hirgelin doono waqtiga loogu talagalay” ayuu sii raaciyey hadalkiisa

HIQ waxay horey ugu wargelisay Shirkadaha Isgaarsiinta inay waajib tahay in adeegooda Lacagaha Mobile-ka la iskugu diro (Mobile Money) ay rukhsad ka haystaan Bangiga dhexe,



sidoo kalena ay hubiyaan in adeegyada lacagaha mobile-lada la iskugu diro ee saaran shabakhoodu iyo kuwa MVNO-ga ah ay u hoggaansamaan tilmaamaha farsamo iyo xadidaadda dhaqdhaqaaqa Bangiga Dhexe iyo go'aannada Guddiga Sare ee NAMLC.

Waxaa sidoo kale Shirkadaha Isgaarsiinta ka mid ahaa waxyaabihii horey loo faray inay diiwaangeliyaan Lafaha (SIMCARDS)-ka macamiisha, iyada oo macamiisha cusub laga qaadayo ugu yaraan sawir iyo faraha, halka kuwii horay u qaatay na Sim-kaararka dib loogu diiwaangaliyo muddo aan ka badnayn 90 maalmood; si waafaqsan Qod. 5-aad ee Sharciga Ka-hortaga Lacag-dhaqidda iyo Maalgelinta Argagixisada iyo Qod. 66 ee Sharciga Isgaarsiinta Qaranka.



Maalinta Gabdhaha ICT-da

April, 2023



Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ) oo kaashanaysa Machad Isgaarsiinta iyo Teknolojiyada Qaranka (NTTI) ayaa ku guuleysatay inay martigeliso munaasabadda maalinta ICT-da gabdhaha si loogu dhiirigeliyo gabdhaha iyo haweenka sidii ay ugu biiri lahaayeen xirfadaha

ICT-da ee sii kordhaya. Munaasabaddan ayaa qeyb ka ah olole sanadle ah oo uu bilaabay Midowga Isgaarsiinta Caalamiga ah si loogu dhiirigeliyo looguna xoojiyo haweenka qeybta teknolojiyada.

Munaasabadda Maalinta Gabdhaha ee ICT-da ayaa waxaa ka mid ahaa qabashada hawlo dhowr ah, oo ay ku jiraan toddobo tababar oo kala duwan oo si lacag la'aan ay ugu faa'iideysteen in ka badan 100 gabdhood.

Maaddooyinkii tababarka lagu qaatay waxaa ka mid ahaa: web development, graphic design, cyber security, computer networks, e-commerce, iyo communication skills.

Sidoo kale, munaasabadda ayaa waxaa lagu soo bandhigay tartan u dhexeeyay gabdhaha, iyadoo afar gabdhood oo ka qaybgalay ay ku guuleysteen abaalmarinno.

Faadumo Maxamed Abuukar oo ah ardayad dhigata sanadkii 3-aad ee Culuumta Kumbuyuutarka ayaa dhankeeda ka hadashay sida ay ugu faraxsan tahay in HIQ iyo NTTI ay fursad u siiyeen inay ka qeybgalaan maalinta gabdhaha ee ICT-da.

“Waxaan qaatay koorsooyin badan, oo ay ku jiraan Amniga internetka, networking, Linux, iyo graphics. Waxaan ku dhiirigelinayaa gabdhaha kale ee ku jira ICT-da inay ka qaybqaataan sannadka soo socda si ay ugu faa'iidaystaan wax badan,” ayay tiri

Tan iyo sanadkii 2018dii ayay hay'addu qabaneysay munaasabadda Maalinta Gabdhaha ICT-da oo caalamka oo dhan laga xuso 27ka April, sanad kasta. in ka badan 300 oo gabdhood ayaana ka faa'iideystey tababarada iyo barnaamijyada ku lammaanan xuska maalintan.



XARGAHA FIBER-KA DALKA



Kulanka oo ka dhacay xarunta Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka ayaa waxaa ka soo qeybgalay Maareeyaha Guud ee Hay'adda, Mudane, Mustafa Yaasiin Sheekh, Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknolojiyada, Mudane, Cabdicasiis Duwane Isaaq iyo Madax kale oo ka kala tirsan Wasaaradda Amniga Gudaha iyo Wasaaradda Deegaanka iyo Isbeddelka Cimilada.

Kulankan ayaa diiradda lagu saaray habraaca looga baahan yahay iney maraan shirkadaha ka shaqeeya xargaha fiber-ka ee badda (submarine fiber optic cable landing) iyo xoojinta wada-shaqeynta iyo xiriirka hay'adaha kala duwan ee dowladda ee ay arrintan khuseyso.

Xargaha fiber-ka ee badda ayaa marka dalka soo galayaan u baahan fasaxyo iyo rukhsad ay dalka kaga shaqeeyaan. Fasaxyadaas oo ay ka mid yihiin:

1. Rukhsadda Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (Submarine Landing Station License)
2. Fasaxa Amni Wasaaradda Amniga Gudaha (Security Clearance)
3. Fasaxa wasaaradda Dekedaha iyo Gaadiidka Badda (Permit to install submarine cable in Somali waters)

4. Fasaxa sahminta ee Wasaaradda Isgaarsiinta iyo Tiknoolojiyadda iyo HIQ (Survey Permit)
5. Fasaxa Bad qabka Bay'ada ee Hay'adda Cimililada iyo Bay'adda (Environmental Clearance)

Gebagebadii kulanka ayaa la isku raacay habraacaas mideysan, taas oo keeni doonta in si nidaamsan loo maamulo howlaha xargaha fiber-ka ee badda, iyadoo la ilaalinaayo amniga guud ee dalka, korna loogu qaadayo dakhliga Dowladda Federaalka ee Soomaaliya.



Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
National Communications Authority



Isticmaalka Aaladaha aan Xarkaha Lahayn

Isticmaalka aaladaha aan xarkaha lahayn waxay u baahan yihiin ogolaanshaha Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka si loo hubiyo in loo adeegsado si waafaqsan halbeegyada iyo qeexitaannada far-samo ee ay ansixisay Hay'adda, taas oo suuro-galineysa isticmaal ammaan ah.

P.O Box 55, BN 03010
Mogadishu - Somalia

VISIT OUR WEBSITE:
www.nca.gov.so

f @ | @SomaliaNCA

HIQ oo ka qeybgashay Shirka Bankiyada iyo Maaliyadda



Febraayo, 2023

Maareeyaha Guud ee Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka (HIQ), Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa ka mid ahaa masuuliyiintii lagu casumay in ay khudbado ka jeediyaan Shirka Bangiyada iyo Maaliyadda Soomaaliyeed oo uu qabanqaabiyay Ururka Bangiyada Soomaaliyeed kaasoo ka dhacay magaalada Muqdisho.

Ugu horreyn Maareeyaha ayaa hadaladiisa ku Iftiimiyay muhiimadda ay leedahay Isku-milanka adeegyada Maaliyadda iyo Teknolojiyada (Fintech) iyo sida nidaamyada dijitaalka u noqdeen kuwo aasaas u ah adeegbixinta maaliyadeed ee dalka, sida bankiyada iyo lacagaha mobile-ka la isugu diro taasoo soo kordhisay habab fudud oo macaamiisha ku maamulan karaan xisaabaadkooda.



“Maaliyadda iyo Teknolojiyada/Isgaarsiinta waxay markii hore kala ahaayeen labo qeybood oo kala duwan- shirkad Isgaarsiin, shirkad Internet, shirkad xawilaad iyo bangi, maantase adeegyadii waa ay is-dhexgaleen hormarka dhigitaal-ka dartiisna waxay noqdeen mid, oo waxaa adag in la kala saaro teknolojiyada iyo maaliyadda, adeeg kastaa horumarkiisa wuxuu ku xiran yahay kan kale. Haddii Isgaarsiinta la horumariyo waxaa horumaraya adeegii maaliyadda, haddii bangiyadii la horumariyo waxaa hormaraya kuwii kale.” ayuu yiri Maareeyaha Guud ee HIQ, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh,

Mudane Mustafa waxaa kale ee uu xusay kaalinta ay HIQ ku leedahay maamulka nidaamyada dijitaalka ee maaliyadda ee dalka isagoo sheegay

in HIQ ay mas’uul ka tahay dhinaca isgaarsiinta iyo nidaamyada kaabayaasha dijitaalka, kuwaasoo fududeynaya in lagu bixiyo adeegyada maaliyadeed sida lacagaha moobilka iyo wallets-ka. Waxa uu sidoo kale tilmaamay in meelaha ugu muhiimsan ee ay HIQ xoogga saarto ay tahay sidii nidaamyada dijitaalka ay u wada gaari lahaayeen dhammaan dadka Soomaaliyeed, gaar ahaan kuwa nugul ama saboolka ah.

Gebo-gebadii, khudbadda Maareeyahaw waxa uu ku sheegay in HIQ ay ka go’an tahay Ilaalinta nidaamyada dijitaalka ee maaliyadeed, isagoo xusay in loo diyaariyey habraayo iyo shuruucyo u gaar ah nidaamyada dhigitaalka ee sahla adeegyada kale oo ay ka mid tahay maaliyadda.

01

HIQ oo heshey
Shahaadada
Caalamiga ah ee
ISO 9001:2015

02

Soo xareynta
saamiga Soomaaliya
ee 2018kii -2020kii
ee dakhliga Ururka
Arabsat.

03

Qorshaha HIQ ee
5ta sano 2023 - 2027
oo la diyaariyay.

04

Ka qaybgalka
shirweynaha
caalamiga ah ee
Talefannada
Gacanta



Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka

06

Isku-xirka Adeegga
Shirkadaha
Isgaarsiinta oo lagu
guuleystay

05

HIQ oo xubin ka
noqotay Shabakadda
Hay'adaha
Isgaarsiinta
Carabta

07

Hay'adda
Isgaarsiinta dalka
Masar oo iskaashi lala
gaaray

14

Koruqaadidda
xirfadda shaqaalaha
Hay'adda Isgaarsiinta
Qaranka

13

Dakhliga
ka soo xarooday
Isgaarsiinta Dalka
oo kordhay

12

Tababarro ICT oo ay
ka faa'iideysteen
in ka badan 100
gabdhood.

WAXQABADKA

LIXDA BILOOD

Janaayo - Juun
2023

11

Shirweynaha
Hay'adaha
Isgaarsiinta
Adduunka oo laga
qaybgalay

09

Guddiga Maamulka
ee Ururka Arabsat oo
xubin laga noqday

08

Internet Protocol
Version 6 oo
Soomaaliya
laga hirgelinayo

10

Bixinta Ruqsadaha
kala duwan
ee shirkadaha
Isgaarsiinta
dalka



SHIRWEYNAHA CAALAMIGA EE TALEEFANNADA GACANTA

Febraayo, 2023

Maareeyaha HIQ, Mudane Mustafa Yaasiin Sheekh, ayaa mid ahaa wafdi uu hoggaaminayay Wasiir-dowlaha Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknoolijiyadda, Mudane Axmed Cismaan Diiriye, kuwaas oo ka qeyb galay Shirweynaha Caalamiga ah ee Isgaarsiinta Mobile-ka (Mobile World Congress), kaasoo lagu qabtay magaalada Barcelona ee dalka Spain.

Shirkan ayaa diiradda lagu saaray mowduucyo kala duwan oo xiriir la leh horumarka adduunku ka sameynayo teknoolijiyadda isgaarsiinta, waxaana ka mid ah waxyaabaha looga hadlay ilaalinta xogta gaarka ee macaamiilka iyo saameynta teknoolijiyada, ballaarinta 5G, maalgashiga shabakadaha (network), siyaasadaha hirarka iyo nidaaminta dhaqaalaha ku tiirsan xogta.

Maareeyaha ayaa inta uu shirka socday kulamo doceedyo la yeeshay masuuliyin kala duwan oo qeyb ka ahaa wufuudda ka qeybgaleysay shirweynaha.

Kulan doceedka koowaad wuxuu maareeyaha oo uu wehliyo Wasiir-dowlaha Wasaaradda Isgaarsiinta & Teknoolijiyadda la kulmay Dr. Cosmas Luckyson Zavazava, Agaasimaha Xafiiska Horumarinta Isgaarsiinta ee Ururka Isgaarsiinta Adduunka (ITU). Waxay ka wada hadleen hindisayaasha ITU ee lagu taageeraayo Isgaarsiinta Soomaaliya, haddii ay ahaan lahayd siyaasadda iyo shuruucda lagu hormarinayo qeybtan iyo horumarinta isgaarsiinta xaaladaha degdegga ah.

Kulanka Labaad ayuu la qaatay Jim O'Connor, Madaxa

Machadka Tababarka Isgaarsiinta Mareykanka (USTTI), waxayna ka wada hadleen arrimo ay ugu muhiimsanaayeen barnaamijyo aqoon-dhis ah, siyaasadaha iyo xeer-nidaamiyeyaasha gaar ahaan teknoolijiyadda jeegaanta, qorshayaasha qaranka ee adeegga Internet-ka sare iyo xeeladaha amniga Internetka.

Kulanka Saddexaad wuxuu la yeeshay Vanessa Gray oo ah Madaxa Waddamada soo koraya iyo jaziiradaha yar yar iyo Qaybta Isgaarsiinta Degdegga ah islamarkaana wakiil ka ah Madaxa Xogta ICT-ga iyo Qaybta Tirakoobka ee ITU-da.

Maareeyaha Guud waxa uu ka hadlay in ITU gacan ka geysato hirgelinta qorshaha Isgaarsiinta degdegga ah kasoo ay ku jiraan qaab-dhismeedka sharciyeed, howlaha iyo ficilada looga baahan yahay marxalad kasta oo kamid ah maareynta masiibooyinka iyadoo la adeegsanaayo xarumaha Isgaarsiinta.

Kulankii u dambeeyay wuxuu Maareeyaha la qaatay Jawad Jalal Abbassi, Madaxa Bariga Dhexe iyo Waqooyiga Afrika (MENA) ee GSMA. Qoddobada ugu weynaa ee kulankan diiradda lagu saaray ayaa ahaa iskaashiga ka dhexeeya GSMA iyo HIQ ee la xiriira cilmi baarista suuqa iyo daraasaadka isgaarsiinta. Waxay na labada dhinac isweydaarsan doonaan macluumaadka iyagoo sidookale iska kaashan doono sameynta xeer-nidaamiyeyaal ku saabsan teknoolijiyadda cusub ee soo kordhaya.



HIQ HORUMAR
JOOGTA AH





Warsidaha
ISGAARSIIN

Cinwaan:

- @ : info@nca.gov.so
- 🌐 : <http://www.nca.gov.so>
- f : Hay'adda Isgaarsiinta Qaranka
- 🐦 : @SomaliaNCA